

DARMAANI



-QORA-
YONIS ABDULLAHI DIRIE

HORDHAC

Bookan akhriskisu kaliya 4 daqiiqo bukugu qadanaya ma ahn
book wakhti badn kaga lumaya sifican indhahaga no amaahi

Hadaad awoodo koob shaah ah so qado dhago (airpods)
hadad hees aad jeceshahay geyso codkeda iskayara gaabi
Si ildoogsi lehna u akhri booka inta aan ka gudbo

Somadan iswaydinin ereyga **DARMAAN**

Darmaan wa faraska dhadiga ah da'da yar ee labta xodan wana
xiligu ugu quruxda badanyhy

Sikalana way noqatayo wa **DAR-MAAN** gabdhi mankeyga
darsiisay jacayl iyo qoomamo tira badn

Kusii dheraan mayno shekadee waad arki doontan idinko
sifican igula dhuuxata

CUDUR DAAR

Banu adam ban ahay khalad wa iga dhici kara waxa laga
yaba in darenakgu si isku badalo wana ka rali galinaya ta

HIBEYN

Waxaan u hibeynaya majaladan yar
Wllshie - **MISKI ABDINUR ABDULLHI**

Kuso dhawaada shekada wa anigo ah
YONIS ABDULLAHI DIRIE

BILOWGA SHEKADA

Jacaylka waxaan u haystay wax sahlan eray la iska yiraahdo dareen la iska ciyaaro. Ma aanan ogeyn in qalbi qof kale ku dhex guban karo lkn caawa ban waxa dareemaya gubasho qalbiga ah iyo qabow jireed bustahana wax wa i tari la'yhy dhaxanta i haysa awgeed sacaduna wa 2:30 indhahayga ilin baa buxisay waxa idaran heesti

Nimcaan hilaac ee ahyd

Ku daalay ku daalay ku dalay xasusahagi

Dabuubtadi hore ubaahday

Markii hore munan darnene

Dib ban kaso jecladay

Waxan maraya xili alle aan ka baryo allow wakhtigii dib igu celi

Waxan ula baxay **DARMAAN** oo magaceda saxda ah ma ahn lkn magaceda markan maqlo gabar logu wacayo ama gabar magaca wadata waxan ka dhax arka gabdhi aan jecla ee cawa aan la dhiman rabo jacylka uqabo lkn kan i haayo caawa wa hal bacad lagu lisay o waxbo ima qaban karto waji aan kula hadlana ma haysto

Gabar daggan indho aad u cascas hadal wanag badan cod marka ay ku hadasho nafta ku dhacaysa Way i jeclayd si cad si daacad ah si aan shaki ku jirin

Markan arako indhaheedu way ifi jireen laakiin anigu indhahayga meel kale ayay fiirin jireen Way i dhageysan jirtay xitaa markaan waxba oranayn hadalkeyga iyo agjogeyga bay aad ujeceed lkn ani waxa ima muqan oo jiho kale ba idarneed

Mar walba iyada ayaa bilaabi jirtay hadalka iyadu way i weydiin jirtay xaaladdayda iyadu way i garab istaagi jirtay marka aan murugsanaa

Aniguse waan ka aamusi jiray marna mawaydinin 'adiguna sidee tahay

Waxaan dhihi jiray Waqti ma hayo Maskaxdaydu meel kale ayay ku jirtaa Jacayl hadda iima diyaarsani

Waxay igu jeclayd si aan shuruud lahayn aniguna waxaan u qaatay inay had iyo jeer joogayso manan daremi jirin marwiba waxay isku dayi jirtay xata in ay imashquliso ludo,challenge,iyo dawashada ciyarahaa

Ayadu waxay ahayd tageero **REAL MADRID** aniguna tagero **BARCENOLA** ayan aha waxayna jecleed in ay markee dheli raban itirahdo 'daawo cawa ana kabadinaya' si ay u hesho wakhti igula shekesato iguna kaftanto

Lkn anigu ciyarihiba darteed ban isaga dayay xiliga ay iso wici jirtay waxa ay u badnan jirtay **22:00 fiidnimo** xiliga marki lagaro mobilka

Intranetka waan damin jiray wicitankana flight ban iska saari jiray si aynan cidna iso wicin

Marar qaad waxa jiri jirtay iney iso qorto ' **subax wanagsan nolosheydi** ' inan furo qoralkeda ban waxan ugu jawabi jiray iska caadi ah manan farxad galin jirin subaxeda lkn qalbi wax jecel marna ma dhawacmo si kasto hadalo u rabin lagu gano

Isbeddelku ma ahayn mid qaylo wata waxuu ahaa mid deggan sidii roob si tartiib ah u da'aya balse wax daad ah aanan lahayn

Maalin ayaan arkay isbeddel farimaheedi way yaraadeen codkeedii Aad ka u naxriista badnaana si yar oo ayar ah ban usii waynaya

Markaan iri maxa qaldan?

waxay itiri '**waxba**

Laakiin qalbi marka uu yiraahdo “waxba” wuxuu ula jeedaa:

“Wax walba way i xanuunayaan.

Waxay i baraysay jacayl anigoo aan baran

Waxay i sugaysay anigoo aan imaan

Waxay i fahmaysay anigoo aan fahmin

Waxay bilowday inay iga foggaato si edeb leh

Ma aysan murmin.

Ma aysan qaylin.

Kaliya way baxday qalbi jab ku duuban aamusnaan

Aniguna markaas ayaan dareemay wax aan hore u dareemin
(MAQNAANSHO)

Markii aan fariin u diray jawaabtu way soo daahi jirtay

Markii aan wacay marmar ma qaban jirin

Waxaan markaas is iri

“Maxaa igu dhacay? Lkn goorma wa mar aan qofki ijeclaa ee naftisa
i hebeyay iga niyad jabay

Jacaylku wuxuu i helay marki uu iga lumay Waxaan bilaabay inaan
ka fikiro iyada habeen walba Hadalladeedii hore ayaan xusuustay.

Daryeelkeedii aan iska indho tiray ayaan gartay lkn wan isku yara
mawelin jiray oo waxaan is laha bari bay so laban way yara
xanaqsantahay lkn wa dhab howshu

Habeen walbo waxaan bilaabay inaan xasusahedi isku maweliyo

Sidii ay u qosli jirtay

Sidii ay iigu hadli jirtay si naxariis leh

Sidii ay mar walba ii dooran jirtay xitaa markaan iyada oo ileh

Dirie nolosha adiga kugu jeclahay i ilaasho hadaladan aad i dhahaysana iga daa qalbigeyga uma wacno

Waxaan u qoray farriin ka timid qalbi goor dambe baraarugay

"DARMAAN hadda ayaan ku fahmay Waan ku jeclahay Fadlan i sii fursad

waxay igu jawaabtay

Dirie mar ayaan ku sugayay adigoo i arkaya hadana qalbigeygu wuu daalay Waan ku cafiyay Laakiin mar dambe ku jeclaan kari maayo

Eyadaas ba waxay igu dhaceen sidii waran cirka ka yimid oo kle culeyskooda

Ma aanan lumin gabar keliya

Waxaan lumiyay qalbi i jeclaa anigoo aan u qalmin

Ma aanan ooyin maalintaas.

Qalbigayga ayaa ooyay ilmo aan indhaha ka imaan oo aad baan u gubanaya hurdo aan kala joogsi lahayn ban galay

Waxaan isku maweliya **heesti nimcan hilaac ee ahayd**

Dareemay inaan kuwayay

Maqanantadina dacifay

Waxan tabay dacadaadi

Dagalkagii u xiisay

Markii hore munan darneene

Dib ban kaso jecaday

Waxaan gartay in qofka ku jeclaada waqtigiisa uu yahay nimco

Laakiin qofka aad goor dambe jeclaato uu noqdo xusuus ku gubtay qalbigana wax yeleysa

Maanta markaan maqlo magaceeda qalbigeygu wuu gariiraa

Ma aha inaan weli rabo waa inaan weli ka qoomameeyo khasarihi igu dhacay

Waxay iga baratay sida loo baxo Aniguna waxaan ka bartay sida loo waayo

Maanta markaan arko sawirradeeda farxadda leh waxaan ogaadaa inaysan iiga baahnayn inay iga bogsato iyadu way bogsatay

Lkn wali anu jacylki igu danbeya haben walbana markan sariirta tago qalbigu waxu iyirahda way so labaneysa lkn cidna ima maqna

Ceelna ina qoda

Heer waxan maraya wax wlbo aan sameeyo laabtu i qabowi la'dahay alla darenku cajibsana

Sheekadani waxay ka dhalatay qoomammo,

qoomammo aan mar dambe wax sixi karin

Waxay ka timid go'aan la dayacay iyo erayo aan la oran waqtigoodii

Qof baa i jeclaaday anigoo aanan garan qiimaha jacaylkamarkaan gartayna wuu iga tagay.

Ma aha inaan waayay fursad kaliya,

waxaan waayay qalbi ii huray naftiisa

anigoo u hurin waayay hal ilbidhiqsi

Qoomamadu ma qayliso qalbigey gubtaa lakiin

Waxay la seexataa xusuusta

waxayna toosisaa qalbi daalan

Sheekadani ma aha mid farxad laga raadinayo

waa mid la akhriyo markaad rabto inaad fahanto

Qof ku jecel adan darensaneen

“waan ku jeclahay **DARMAAN**” lkn wanagagi iyo darenkagi qurxana
manan calfan

Hadii aad akhrineyso bookanogow in erayadan ay ka yimaadeen
qalbi og in dib loo laaban karin

isla markaana og in qoomamadu aad xambaran doonto inta
nolosha ka dhiman

DHAMAAD

Wixii talo iyo tusaale ah igala so xiriir +252614168829

BOOKSKAN WA KUWA AAN QORAY HADAD UBAHANTAHAY WAXAD
KA HELEYSA MAREEGTA AMA PAGE TELGRAM @somalibooks

